

DAYNTA CANSHUURTA IYO MIISAANIYADA HORU DHACA AH

Dawlada Hoose ee Bloomington waxay qaban doontaa dhagaysi dadwayne Isniinta, Diseembar 6 deeda, markay saacadu tahay 6:00 maqribnimo si ay u dhagaysato fikirkaaga ku aadan daynta canshuurta iyo miisaaniyada 2022 ee ay Magaaladu soojeedisay. Dhageysiga waxaa lagu qaban doonaa Waaxda Dawlada Hoose ee kutaala Bloomington Civic Plaza 1800 West Old Shakopee Road. Si aad u hesho macluumaadka ku saabsan sida uu qofku qaab toos ah ama qaab oonleen ah oga qaybgalo, booqo <https://blm.mn/cc-1206> ama wac 952-563-8790.

Canshuurta hordhaca ah ee Magaalada 2022 waxaa dejiyay golaha waxayna dejiyeen Sebteembar 13 keeda, 2021 lacag dhan \$68,296,727, waxayna kor u kacday 2.75% marka la eego daynta canshuurtii 2021. Lacagta canshuurta ah ee bilaha waa la yarayn karaa kahor dhaqan gelinta ugu danbaysa, laakiin lama kordhin karo. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan miisaaniyada Magaalada, oo ay kujiraan macluumaadka dhacdooyinka Hawlaha Miisaaniyada Dadwaynaha ee la qabtay bilihii Agoosto iyo Oktoobar, booqo blm.mn/budget.


MA OGTAHAY? WAXAAD U QALMI KARTAA LACAG CELINTA CANSHUURTA HANTIDA!

BOOQO BARTA [HTTPS://WWW.REVENUE.STATE.MN.US/PROPERTY-TAX-REFUND](https://www.revenue.state.mn.us/property-tax-refund) SI AAD U HESHO FOOMKA MIPR IYO SI AAD MACLUUMAAD DHEERAAD AH U HESHO.



SAAMEYNTA QIIMAHA SUUQA EE KU AADAN CANSHUURTA HANTIDA

Saameynta ugu wayn bayaanada ee ku aadan canshuurta hantida 2022 ma noqon doono kor u kaca guud ee cadadka canshuurta, laakiin waxaa isbadelay culeyska canshuurta ganacsiyada guryaha la dego. Qiimaha canshuurta hantida ee guud ee magaalada waxaa loo qoondeeyay mulkiilayaasha hantida ayadoo lagu saleenaayo qiimaha iyo nooca hantida ay leeyihiin sida ku xusan qawaaniinta Gobalka Minnesota. Suuqa guryaha la dego waxay kor u kaceen qaab aad u sareeya dhanka kale qiimaha dhexdhexaadka ah ee guryaha waxay ahaayeen \$286,400 waxayna gaareen \$307,200 halka qiimayaasha



DAKHLIGA DEEQDA GUUD

Canshuuraha hantida waxay ka kooban yihiin 69% oo kamid ah dakhliga deeqda guud ee Magaalada, halka la saalaadinaayo 9% inay ka imaan doonaan albeerkooyinka deegaanka iyo canshuuraha isdiwaangelinta 2022. Masiibada


xanuunka ayaa si wayn hoos ugu dhigtay ilaha dakhliga. Tusaale ahaan, sanadkii 2019, canshuuraha albeerkooyinka iyo isdiwaangelinta ee laga helay Sanduuqa Guud waxau ahayd \$10.4 milyan, laakiin sanadka 2022, waxaa la qiyaasayaa inay gaari doonaan \$7.8 milyan.

KHARASHAADKA DAKHLIGA GUUD

Inta badan deeqaha waxay aadaan Booliska, Waaxda Shaqada Guud iyo Dab Demiska. Shaqooyinka Guud



waxay ka kooban yihiin wadooyinka, beeraha, waxayna bixiyaan adeegyada injineernimada, waxayna ilaaliyaan meelaha biyihu kujiraan ee Bloomington, dhanka kale waxay bixiyaan adeegyo gaadiid oo habboon. Miisaaniyada Waaxda Dab demiska waxay sameysay kor u kac saad laga bilaabo 2021 si wax looga qabto arrimaha la xariira shaqaaleysiinta iyo halganka ayadoo la racaayo nidaamka shaqaalaha la waco markay shaqo jirto. Aagga Kharashaadka kale ee Deeqda Guud waxaa kamid ah Hormarinta Bulshada sida Qorsheynta, Dhismooyinka



Dadwaynaha iyo Xariirada Bulshada iyo sidoo kale Waaxda Hawlaha. Kharashaadka Deeqda Guud waxaa sidoo kale kamid ah kuwa Beeraha iyo Waaxda Madadaalada iyo si lamid ah Hawlaha Magaaladu qabto ee muhiimka u ah adeegyada dawlada deegaanka sida Ilaha Dadwaynaha, Karaaniga Magaalada, Sharciiga, Dhaqaalaha, iyo Xaafiiska Maamulaha Magaalada.